

IIB MA GALO  
FAAFINTA RASMIGA AH



Sannadka 13aad Muqdisho 24 Maarso 1985 L. 1R3

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA

LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 9 ee 17

Feb. 1985, Billad Maamuus Xiddigta  
Soomaaliya.

Bogga 222

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 10 ee

22 Feb. 1985, Dhismaha Dawladda  
Cusub ee J.D.S.

» 223

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYIIS IYO WIXII L. M. AH

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 24.3.85

Lumid Jeeg War. L. 0029525 ku qoran » 227  
Saciid Xasan Xirsi.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.4.85

Lumid Jeeg War. L. 564370 ku qoran  
Gahayr Cali Xandulle.

» 228

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA LABAAD

X E E R

**XEER MADAXWEYNAHA JDS**, L. 9 ee 17 Feb. 1985,  
Billad Maamuus ee Xiddigta Soomaaliya «Grande  
Ufficiale» oo lagu maamuusay Jaalle S/Guud Giu-  
seppe Piovano.

**MADAXWEYNAHA JDS**

**MARKUU ARKAY:** Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

**MARKUU ARKAY:** 5narciga Lam. 6aad ee 19ka Ok-  
toobar 1970 ee Abaaimarinta;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Qoraallada iyo Warbixinta  
Wasirka wasaaradda Gaasnaandhigga;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Kaarinta weyn uu ka geys-  
tay adkeynta iyo sii xooginta xiriirka labada waa-  
dan Soomaaliya iyo Taliyaaniga isagoo taageero  
weyn ka siinaaya Wasaaradda Gaasnaandhigga  
Soomaaliyeed Qalabeynta iyo Hubeynta, siiba mar-  
kii uu socday dagaalku 1982, S/Guud Giuseppe  
Piovano oo ah Xoghayaha Joogtada ee Wasaarad-  
da Gaashaandhigga Taliyaaniga isla markaana ah  
Agaasimaha Guud ee Qalaboynta Ciidamada.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Inay laga maarmaan tahay  
in dadka ku shaqeeyey Niyad Sami Soomaaliyeed  
iyo Dawladeedba, loogana reebo raad wax ku  
ool ah;

**MARKUU TIXGELIYEY:** Talada Guddiga Abaalma-  
rinta M.J.D.S.

**WUXUU SOO SAARAYAA:** Xeerka soo socda:

**QODOBKA KELIYE**

Waxaa lagu maamuusay Billadda GRANDE UFFI-  
CIALE ee Xiddigta Soomaaliya Jaalle S/Guud Giu-  
seppe Piovano.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madax-  
weynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 17.2.1985

**MADAXWEYNAHA JDS**  
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 10 ee 22 Feb. 1985,  
Dhismaha Dawladda Cusub ee JDS.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, faqradda 7aad iyo  
86aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Dastuuriga lambar 49  
ee 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuur-  
ka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 13ka Juun  
1962, kuna saabsan NIDAAMKA DAWLADDA iyo  
beddeladyadii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay  
in Dawlad Cusub la dhiso oo xilka la bilowda Ma-  
dasha Sharci dejinta 2aad ee Jamhuuriyadda Di-  
moqraadiga Soomaaliya;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Siyaasad-  
da ee Golaha Dhexe Xisbiga Hantiwadaagga Ka-  
caanka Soomaaliyeed;

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka soo socda:  
Qod. 1aad

Laga billaabo 22ka Febraayo 1985, waxaa dib loo  
dhisay Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo-  
maaliya.

Qod. 2aad

Golaha Wasiirrada ee Dawladda cusub waxa uu  
ka kooban yahay Xildhibaannada soo socda:

1. Sarreeve Guud MAXAMED CALI SAMATAR,  
Madaxweyne Kuxigeenka 1aad ee JDS: Wasiirka Gaa-  
shaandhigga;

2. S/Gaas XUSEEN KULMIYE AFRAX,  
Madaxweyne Kuxigeenka 2aad ee JDS: Wasiirka Qor-  
shevnta Qaranka;

3. S/Guuto AXMAD SALAYMAAN CABDALLA:  
Wasiirka Arrimaha Gudaha;

4. Jaalle CABDIRAXMAAN JAAMAC BARRE:  
Wasiirka Arrimaha Dibedda;

5. G/Sare AXMED MAXAMUUD FAARAX: Wa-  
siirka Macdanta iyo Biyaha;

6. Jaalle SHEEKH XASAN CABDULLAAHI FAARAX: Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;
7. S/Guuto MAXAMED SHEEKH CUSMAAN: Wasiirka Maaliyadda;
8. S/Gaas CABDALJA MAXAMED FAADIL: Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga;
9. G/Sare MAXAMED CUMAR JEES: Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha;
10. Jaalle CABDIRAXMAAN CABDULLE CUSMAAN: Wasiirka Waxbarashada iyo Barbaarinta;
11. Jaalle CABDIQAASIM SALAAD XASAN: Wasiirka Hawlaha Guud;
12. S/Guuto BILE RAFLE GUULEED: Wasiirka Beeraha;
13. G/Sare MUUSE RABIILE GOOD: Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
14. Jaalle AADAN MAXAMED CALI: Wasiirka Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda;
15. Jaalle YUUSUF XASAN CILMI: Wasiirka Caafimaadka;
16. G/Sare MIRE AWAARE JAAMAC: Wasiirka Shaqada iyo Isboortiga;
17. Jaalle MAXAMUUD SACID MAXAMAD: Wasiirka Dalxiiska;
18. S/Guuto MAXAMUUD GEELLE YUUSUF: Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekedaha;
19. Jaalle CABDULLAAHI COSOBLE SIYAAD: Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta;
20. Jaalle CABDISALAAM SHEEKH XUSEEN: Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare;
21. Jaalle AXMAD XABIIB AXMAD: Wasiirka Horumarinta Dooxada Jubba;
22. Jaalle JAAMAC GAAS MACAAWIYE: Wasiirka Gaadiidka Dhulka iyo Cirka;

23. Jaalle CABDULLAAHI AXMAD CADDOW: Wasiiru Dawlaha Arrimaha Dhaqaalaha iyo Siyaasadda ee Madaxtooyada JDS;

24. Jaalle AXAMAD JAAMAC CABDULLE: Wasiiru Dawlaha Arrimaha Shaqaalaha iyo Bulshada ee Madaxtooyada JDS;

25. Jaalle MAXAMAD MAXAMUUD WARSAME: Wasiiru Dawlaha Arrimaha Gudaha;

26. Jaalle MAXAMAD CALI XAAMUD: Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda;

27. S/Guuto AXMAD SAHAT, CALI: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gaashaandhigga;

28. S/Guuto AADAN CABDULLAAHI NUUR: Wasiir kuxigeenka Wasaaradda Gaashaandhigga;

29. Jaalle YUUSUF CALI CUSMAAN: Wasiir kuxigeenka Wasaaradda Qorsheynta Qaranka;

30. Jaalle MAXAMUUD SHEEKH MURSAL: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

31. Jaalle KHAJUF MUUSE SAMATAR: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gar. iyo Arrimaha Diinta;

32. Jaalle CABDULLAAHI WARSAME NUUR: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Maaliyadda;

33. Jaalle MAXAMAD XAASHI CIGAAL: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Maalivadda;

34. Jaalle MAXAMAD NUUR CALIYOW: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

35. Jaalle MAHAD DIRIR GUULEED: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

36. Jaalle CABDIRASHIID SHEEKH AXMAD: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Warfaafinta iyo H. Dadweynaha;

37. Jaalle FAADUMA AXMAD CAALIN: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta;

38. J.1e XASAN MAXAMAD CUSMAAN «Jubur»: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta;

39. Jaalle CABDIRAXMAAN JAAMAC MAXAMAD: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Hawlaha Guud;

40. Jaalle MAXAMUUD CABDI NUUR: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Beeraha;

41. Jaalle MAXAMAD XASAN BARRE: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Beeraha;

42. Jaalle CALI SAALAX CABDIKARIIN: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

43. Jaalle SHIRE SUUDI MAXAMUUD: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda;

44. Jaalle MAXAMAD SHEEKH CALI MUNASAR: Wasiir kuxigeenka Wasaaradda Caafimaadka;

45. Jaalle RAAQIYA XAAJI DUCAALE: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Caafimaadka;

46. Jaalle MAXAMAD YUUSUF AXMAD: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;

47. AADAN XUSEEN XEYLE: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;

48. Jaalle CABDULLAAHI MAXAMUUD MIRE: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha;

49. Jaalle MAXAMAD CABDI YUUSUF: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta;

50. Jaalle YUUSUF CABDI KOLOMBOS: Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhacaa gelavaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saaravaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 22.2.1985

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

## MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ: Faafin Jeeg Lumay Lr. 0029525  
(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegga  
Wareega ee lam. yahay 0029525;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga  
Kaydka Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65, (Lumid J gga War -  
ga lam. yahay 0029525 kuna qoran lacag dhan  
Sh-So. 50,000/= kuna qoran yahay J-le Saciid Xa-  
san Xirsi.

## WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Jeeggaas kor ku xusan J-le  
Saciid Xasan Xirsi marka ay ka soo wareegto muddo  
20 casho gudahood ah laguna shaaciyo Xafiiska Fau-  
finta Rasmiga ah ee Dawladda.

## WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga  
saaro Jaalle Saciid Xasan Xirsi iyadoo la sugayo mud-  
dada kor ku xusan.

Burco, 24.3.85

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)  
(Dr. Abuukar Islow Cumar)  
Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco  
(Jaamac Cabdullaahi Bile)

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lam-barkiiisu ahaa 564370 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iskalahaa Jaalle Gahayr Cali Xandulle sida ku cad warqadda lambarkeedu 004604 taariikhdeedu 9.4.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

## WUXUU XEERIIYAY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 564370 oo ku qoran Jaalle Gahayr Cali Xandulle ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

## WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargaysa u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 10 Abriil 1985

GUDDOOMIYAHA MGB  
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax